WE ARE Valley
MEDICAL CENTER & CLINICS

# Tilmaamaha Foomka Codsiga Kaalmada Dhaqaalaha

Gobalka Washington ayaa qasab uga dhigaaya dhammaan isbiyaallada inay kaalmo dhaqaale siiyaan shaqsiyaadka iyo qoysaska buuxiya shuruudaha qaar ee dakhliga. Sida aad ugu qalmi karto kaalmada dhaqaalaha ayadoo lagu saleynaayo tirada iyo dakhliga qoyska. Valley Medical Center & Clinics ayaa bixisa kaalmada dhaqaalaha ee bukaan kasta/dammaanad-qaadayaasha oo dakhliga guud ee qoyska gaaraayo ilaa 400% Heerka Fakhriga ee Federaalka (FPL) waxaana lagu dabaqaa tirada qoyska kadib marka la dhameeyo caymis kasta oo dhinac sadexaad bixinaayo. Xarunta iyo/ama adeegyada xirfadda ee Valley Medical Center & Clinics:

- 0% - 300% ee heerka FPL si loo helo qiimo dhimista 100% ee kaalmada dhaqaalaha.

Adeegyada xarunta ee keliya leh taariikhaha isbitaal ka saarida oo ku beegan ama kadib Luuliyo 1, 2022, laguna baxshay Valley Medical Center & Clinics:

- 301% - 350% ee heerka FPL si loo helo qiimo dhimista 75% ee kaalmada dhaqaalaha
- 351% - 400% ee heerka FPL si loo helo qiimo dhimista 50% ee kaalmada dhaqaalaha

Maxay kaalmada dhaqaaluhu dabooshaa? Xeerka kaalmada dhaqaalaha ayaa daboolaaya adeegyada ku haboon ee isbitaalka lagu baxsho (xarunta) iyo kuwa aan isbitaalka lagu bixin (xirfadeed) ee ay bixiso Valley Medical Center & Clinics ayadoo ku xiran u qalmidaada. Kaalmada dhaqaalaha ayaa laga yaabaa inaysan daboolin dhammaan qarashaadka daryeelka, ayna ku jiraan adeegyada ay bixiyaan ururada kale. Waxaad codsan kartaa xog dheeraad ah ama waxaad akhrin kartaa webseedkeena oo ah valleymed.org/financialassistance.

Si looga shaqeesiiyo codsigaaga, waa inaad: Na siisaa macluumaad ku saabsan qoyskaaga noona sheegtaa tirada xubnaha qoyskaaga ee guriga kula dagan (qoyska waxaa ku jira dadka ay kaala dhexayso dhalashada, guurka, ama koriimada ilmaha kuwaas oo isla nool)

- Waa inaad noo sheegtaa dakhliga guud ee bishii soo gala qoyskaaga (kahor canshuuraha iyo lacagaha canshuuruhu jartaan)
- Waa inaad na siisaa dukumeentiga dakhliga qoyskaaga aadna keentaa shaacinta hantida
- Soo raaci macluumaadka dheeraadka ah haddii loo baahdo, tusaale, warqadaha taageerada si aad u xaqiijiso macluumaadkaaga.
- Saxiix oo taariikhda ku qor foomka

Si aad u hesho codsiga Kaalmada Dhaqaalaha iyo dukumeentiga taageeraaya oo Ingiriis ku qoran, ama Isbaanish, waxaad hadda adeegsan kartaa MyChart si aad ugu dirto dukumeentiyadaada. Dhammaan codsiyada kale ee lasoo gudbiyo ayaa wali lagu soo gudbin doonaa boostada, fakiska, ama si toos ah. Macluumaad kasta oo loosoo gudbiyay ka baaraan degis ayaa loo tixgelin doonaa macluumaadka caafimaadka ee dhawrsan sida ku cad Sharciga Fududeynta Caymiska iyo Isla Xisaabtanka ee Caafimaadka (HIPAA).

Si looga shaqeesiiyo codsigaaga, waa inaad tahay bukaan diiwaan gashan oo ah Lambarka Diiwaanka Caafimaadka (MRN).

| **Valley Medical Center & Clinics** | **Valley Medical Center & Clinics** |
|---|---|
| Adeegyada Dhaqaalaha ee Bukaanka<br>P.O. Box 59148<br>Renton, WA 98058-2148<br>Taleefanka 425.690.3578<br>FAKISKA 425.690.9578<br>Isniin-Jimco 8:00 a.m. – 5:00 p.m.<br>mychart.valleymed.org/#mychart | Patient Financial Services<br>3600 Lind Ave SW, Suite 110<br>Renton, WA 98057-4970<br>Taleefanka 425.690.3578<br>FAKISKA 425.690.9578<br>Isniin-Jimco 8:00 a.m. – 5:00 p.m.<br>mychart.valleymed.org/#mychart |

*Fadlan la xiriir Adeegyada Dhaqaalaha Bukaanka haddii aad qabto wax su'aalo ah ama aad u baahan tahay in lagaa caawiyo buuxinta codsigeenaan. Waxaad heli kartaa caawimaada sabab kasta, ayna ku jirto caawimaada naafada iyo luuqada. Waan kugu soo wargelin doonaa go'aanka kama danbaysta ah ee u qalmidda iyo xuquuqda racfaanka, haddii ay ku khusayso, 14 maalmood gudahood marka aan helno codsiga buuxa ee kaalmada dhaqaalaha, ayna ku jirto cadeynta dakhliga. Adoo gudbinaaya codsiga kaalmada dhaqaalaha, waxaad noo fasaxaysaa in aan qiimeyn muhiim ah samayno si aan u xaqiijino macluumaadka.*

WE ARE Valley MEDICAL CENTER & CLINICS

# Foomka Codsiga Kaalmada Dhaqaalaha - Qarsoodi

*Fadlan si dhameystiran u buuxi dhammaan macluumaadka. Haddii aysan ku khusayn, tigsaar "Maya" ama ku qor "Aan ku khuseyn" Soo raaci bogag dheeraad ah haddii loo baahdo.*

## MACLUUMAADKA BAARITAANKA

Ma u baahan tahay turjumaan? ☐ **Haa** ☐ **Maya** *Hadday haa tahay, qor luuqada aad doorbideyso:*

Bukaanku ma codsaday Medicaid? ☐ **Haa** ☐ **Maya** *Waxaa laga yaabaa in laga doonaayo inuu codsado kahor inta aan loo tixgelin kaalmada dhaqaalaha*

Bukaanku hadda ma haystaa caymis caafimaad? ☐ **Haa** ☐ **Maya**

Bukaanku ma helaa adeegyada dadwaynaha ee gobalka sida TANF, Basic Food, ama WIC? ☐ **Haa** ☐ **Maya**

Bukaanku hadda ma hooy la'aan baa? ☐ **Haa** ☐ **Maya**

Baahida daryeelka caafimaadka ee bukaanku ma la xiriirtaa shil gaari ama dhaawac shaqo? ☐ **Haa** ☐ **Maya**

## FADLAN OGOOW

- Ma damaanad qaadi karno in aad u qalmi doonto kaalmada dhaqaalaha, xataa haddii aadan codsan.
- Marka aad soo gudbiso codsigaaga, waxaa laga yaabaa inaan hubino dhammaan macluumaadka aana kaa codsano xog dheeraadka ah ama cadeynta dakhliga.
- 14 maalmood gudahood kadib marka aan helno codsigaaga buuxa iyo dukumeentiyada, waxaan kugu soo wargelin doonaa haddii aad u qalanto kaalmada.

## MACLUUMAADKA BUKAANKA IYO CODSADAHA

| | | | |
|---|---|---|---|
| Magaca Koobaad ee Bukaanka | Magaca Dhexe ee Bukaanka | Magaca Ugu Danbeeya ee Bukaanka | |
| ☐ Lab ☐ Dhedig<br>☐ Wax kale (waad qeexi kartaa _______) | Lambarka Diiwaanka Caafimaadka. (MRN) | Taariikhda Dhalashada Bukaanka | Lambarka Social Security ee Bukaanka. (waa ikhtiyaari) |
| Qofka Dhiibaaya Qarashka (Damiinka) | Xiriirka Kala Dhexeeya Bukaanka | Taariikhda Dhalashada ee Damiinka | Lambarka Sooshal Sekuuratiga ee Damiinka. (waa ikhtiyaari) |

Ciwaanka Boostada

_______________________________________________

_______________________________________________

Magaallada Gobalka Koodhka Boostada

Lambarada koodhka Taleefanka Aaga

( _____ ) ______________________

( _____ ) ______________________

Ciwaanka Iimeylka:

Marxallada Shaqada ee Qofka Dhiibaaya Qarashka:
☐ **Shaqeeya** (taariikhda shaqada la bilaabay): ☐ **Bilaa shaqo ah** (muddo intee dhan ayuu shaqo la'aan ahaa):
☐ **Iskii u Shaqeysta** ☐ **Arday** ☐ **Naafo** ☐ **Hawlgab ah** ☐ **Wax kale:**

## MACLUUMAADKA QOYSKA

Liiska xubnaha qoyska ee gurigaaga dagan, **oo aad adigu ku jirto.** “"Qoyska" waxaa ku jira dadka ay kaala dhexayso dhalasho, guur, ama koriimo oo kula nool.

**TIRADA QOYSKA _________** *Soo raaci bog dheeraad ah haddii loo baahdo*

| Magaca | Taariikhda Dhalashada | Xiriirka Kala Dhexeeya Bukaanka | Haddii uu jiro 18 ama ka wayn: Magaca shirkada uu u shaqeeyo ama isha dakhliga | Haddii uu jiro 18 sano ama kawayn: dakhliga guud ee soo gala bishii (kahor canshuuraha): | Sidoo kale ma codsanayaa kaalmada dhaqaalaha? |
|---|---|---|---|---|---|
| | | | | | ☐ **Haa** ☐ **Maya** |
| | | | | | ☐ **Haa** ☐ **Maya** |
| | | | | | ☐ **Haa** ☐ **Maya** |
| | | | | | ☐ **Haa** ☐ **Maya** |

**Dakhliga dhammaan xubnaha qaangaarka ah ee qoyska waa in la sheegaa. Ilaha dakhliga waxaa ku jira, tusaale:** - Mushaaraadka - SSI
- Shaqo la'aan - Iskii u shaqeeya - Magdhawga Shaqaalaha - Naafada - Taageerada Ilmaha/xaaska
- Barnaamijyada shaqada waxbarashada (ardayda) - Gunnada hawlgabka - Qoondooyinka xisaabta kaydka hawlgabka - Meel kale (*fadlan sharax)*

WE ARE Valley
MEDICAL CENTER & CLINICS

# Foomka Codsiga Kaalmada Dhaqaalaha - Qarsoodi

## XOGTA DAKHLIGA

***xasuusnoow**: Waa in aad ku dartaa cadeynta dakhliga codsigaaga.*

**Waa in aad bixisaa macluumaadka dakhliga qoyskaaga. Xaqiijinta dakhliga ayaa loo baahan yahay si loo go'aansho kaalmada dhaqaalaha. Dhammaan xubnaha qoyska ee jira 18 sano ama ka wayn waa in ay shaaciyaan dakhligooda. Haddii aadan bixin karin dukumeentiga, waxaad soo gudbin kartaa bayaanka qoraalka ah oo saxiixan oo qeexaaya dakhligaaga. Fadlan keen cadeynta il kasta oo dhaqaale oo la aqoonsaday.**

**Tusaaleyaasha cadeynta dakhliga waxaa kamid ah:**

- Bayaanka mushaar jarista ee "W-2"; ama
- Risiidyada mushaarka hadda (3 bilood); ama
- Bayaannada Bangiga (3 bilood); ama
- Canshuur celintii sanadkii lasoo dhaafay ee dakhliga, ayna ku jiraan jadwallada haddii ay jiraan; ama
- Bayaannada qoran, ee saxiixan ee kasoo baxay loo shaqeeyaan ama dadka kale (warqadda cadeynta) oo sheegaysa xaaladaada hadda ee dhaqaalaha iyo xaaladaha haddii aadan hayn cadeynta dakhliga; ama
- Foomamka ansixinaaya ama diidaaya u qalmidda Medicaid iyo/ama kaalmada caafimaadka gobalku maal geliyo; ama
- Foomamka ansixinaaya ama diidaaya magdhawga shaqo la'aanta; ama bayaannada qoran ee kasoo baxay shaqo bixiyaasha ama wakaaladaha faya dhawrka.

## MACLUUMAADKA QARASHKA BIL KASTA *(Fadlan soo raaci bog dheeraad ah si aad ugu qorto daymaha kale, haddii loo baahdo.)*

*Waxaan u adeegsanaa macluumaadkaan si aan u helno sawirka buuxa ee xaaladaada dhaqaalaha.*

| | | | |
|---|---|---|---|
| Kirada/Daynta Guriga | $ | Qarashaadka Caafimaadka | $ |
| Lacagaha joogtada ah ee Caymiska | $ | Adeedyada Guriga | $ |
| Daynta/Kharashaadka Kale | $ | *(Taageerada ilmaha, daymaha, daawooyinka, kuwo kale)* | |

## MACLUUMAADKA HANTIDA (*looma tixgelinaayo u qalmidda kaalmada dhaqaalaha laakiin waxaa loo adeegsanayaa barnaamijyada kale)*

| | |
|---|---|
| Baaqiga Hadda ku Jira Xisaabta Jeega<br>$<br>Baaqiga Hadda ee akoonka Kaydka<br>$ | Qoyskaagu ma haystaa hantiyadana kale? **Fadlan tigsaar dhammaan meelaha khuseeya**<br>☐ Stocks ☐ Bonds ☐ 401K ☐ Akoonnada Kaydadka Caafimaadka<br>☐ Sanduuqyada Dhaxalka ☐ Guriga (marka laga reebo kan rasmiga ah ee aad dagan tihiin)<br>☐ Leh ganacsi |

## MACLUUMAADKA DHEERAAD AH

Fadlan soo raaci bog dheeraad ah haddii uu jiro macluumaad kale oo ku saabsan xaaladaada hadda ee dhaqaalaha oo aad doonayso in aan ogaano, sida caqabad dhaqaale, dakhliga xiliyeedka ama ku meel gaarka ah, ama khasaarada shaqsiga ah.

## HESHIISKA BUKAANKA

Waan fahmayaa in Valley Medical Center & Clinics ay xaqiijin karto macluumaadka ayadoo dib u eegaysa xogta daynta oo xogta ka helaysa ilaha kale si ay uga caawiso go'aaminta u qalmidda kaalmada dhaqaalaha ama qorsheyaasha lacag bixinta.

Waxaan qirayaa in macluumaadka kore run tahay ayna saxan tahay intii aan ka ogahay. Waan fahamsanahay in haddii macluumaadka aan bixiyo la go'aansho inay been tahay, natiijadu noqonayso in la diido kaalmada dhaqaalaha, aniga ayaana masuul ka noqon doona lagana filayaa inaan dhiibo qarashka adeegyada la dhiibay.

Magaca Qofka Codsanaaya Taariikhda